

# FAAFINTA

# الرسمية



# RASMIGAAH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 23 Abriile 1981 L. 3 r 4

SAANADKA HIL SOO BAXA

نحوه شهريه

"Faafinta Raafinta ah ee Nadaaxtooyada J.D.S.

QIMMAHA : waa 5 shilin Inbar walba RUKUNKA : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — djbedana waa Sh. So. 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo waxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fàafintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuurahà ee Wàshàràddà Lacagta

## KOOBINTIN

QAYBTA

SHARCI

KOOWAAD

SHARCI L. 26 ee 12 Feb. 1981, Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS, Dawladda Mareykanka (AID).	»	610
SHARCI L. 26 ee 10 Maarr. 1981, Meelmarin Heshiis.	»	612
LAW No. 23 on 10th March 1981, Instrument of Ratification.	»	613
SHARCI L. 1 ee 31 Maarsco 1981, Baabi'inta Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha.	»	614
SHARCI L. 2 ee 31 Maarsco 1981, Baabi'inta Wakaaladda Ganacsiga Dharka iyo Maacuunka.	»	616

Wakaaladda M. Qaranka

SHARCI L. 3 ee 31 Maarsø 1981, Baabi'inta Wakaaladda Horumarinta Koolaha.	»	618
QAYBTA	LABAAD	
XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 23 ee 4 Feb. 1981, Magacaabid Garsoore G/le Cabid Cali.	»	620
XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 24 ee 10 Feb. 1981, Magacaabid Garsoore G/le Maxamed Yuusuf Axmed.	»	622
XEER WASAARADDA H. GUUD L. 25 ee 30 Sebteembar 1980 dhul Dowlaadeed oo loo oggolaaday SHIRKADDA WAR- SHADDA I.F.C.A. CHEMICALS kana Waakiil ah ISAAQ CALI CARAALE - ku- na yaal Deg. Wardhiigley	»	624
QAYBTA	SADDAXAAD	
SOCIETA' COMMERCIALE Italo-Somalo S.C.I.S.-S.P.A. Ogeysiis isu yeerid Shir caadi ah. L. 391	»	627
SOCIETA' ROMANA IN SOMALA-S. P. A. Isu yeerid Shir caadi ah L. 392	»	628
SOCIETA' AGRICOLA Italo Somala-S.A.I.S. S.P.A. Ogeysiis isu yeerid Shir caadi ah L. 393	»	629
MAXKAMADDA G. BANAADIR, 20.4.1981 Lumid Buug Keyd L. 5740 L. 391/bis	»	630
MAXKAMADDA G. W/GALBEED 25.4.1981 Lumid Jeeg. War L. 030545	»	631

QAYBTA

KOOWAAD

S H A R C I

SHARCI L. 26 ee taariikh 12.2.1981 Oggolaansho Ho-shiis dhexmaray JDS iyo Dawladda Mareykanka

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday heshiiska dhexmaray JDS iyo Dawladda Mareykanka oo idmatay Wakaaladda Caalamiga ah ee Horumarinta (AID) kuna saabsan daryeelka caafimaadka co saameeya afar Gobol oo ka mid ah Gobolla-da Dalka.
2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaala-da Muqdisho taariikhdu markay ahayd 19.6.79.
3. Heshiisku wuxuu ka mid noqonay aaSharcigan isagoo lifaaq u yahay.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobba-da heshiiska lagu soo tilmaamay Qod. 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Shariyada iyo xeerarka Daika, dhaqan gelintiisuna waxaa la waafajinayaa Qod. 72aad (1) ee Dastuurka iyo Qodebbada uu ka saameeyo ee Heshiiska.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman sida uu qabo Qod. 82aad ee Dastuurka JDS.

— 611 —

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu  
soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, wu-  
xuuna ka mid noqonayaa Sharciyada iyo Xeerarka  
Dalka.

Muqdisho, 12.2.1981

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 26 ee 30 Maarsu 1981, Meelmarin Heshiis.

MADAXWEYNAYA JDS

ISAGOO ARKAY : Qodobka 67aad xubintiisa 5aad,  
Qodobka 82aad xubintiisa 4aad iyo Qodobka 72aad  
xubintiisa laad ee Laatuunka J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Mashruuca Daryeelka  
G. Mirearka Afsoo'ga ah ee dhexmaray Dawladda  
Jid iyo Deynaha Maacyanka iyadoo idmatay  
Wakasaduwa Daawtiiga ah ee Horumarinta (AD),  
Izagona kala saxiliyay Muqdisho, 19kii Juun, 1979;

ISAGOO TIKKHUNAYA : Oggolaanchaha Golaha  
Shacbiiga Qaranka ee Heshiiska aan sco sheegnay  
ee taariikhdiisu ahayd 10kii Febriuary 1981.

WUXUU SCO SAAPAYAA

Xeekhaan sco sseedaat:

Qodobka laad.

Heshiiska Mashruuca Laajelka Caafimaadka  
Asaasiga ah ee Jidhuxmaray Dawladda Jormuuriyadda  
Dimocraatiga Soomaaliya iyo Deynaha Maacyanka  
iyadoo idmatay Wakaafudha Centraal oo ah ee Horumarinta (AD),  
Izagona kala saxiliyay Muqdisho, 19kii Juun 1979, WAA LA MUHIMMARIYAY.

Qodobka laad

Heshiisku wuxuu ku yeceth doonaa Jamhuuriyadda  
Minigaadiga Soomaaliya astaasi, laaci ah wuxuuna  
dhaqan gelayaa markuu saxeexo MADAXWEYNAYA J.D.S.  
Xeekhaan waa loogu sco sanii doonaa Faafinta  
Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 10.3.1981.

MADAXWEYNAYA JDS

(S/Gaas Maxamed Sivaad Barre)

L A W No. 26 on 10th March 1981 Instrument of Ratification.

**THE PRESIDENTE SDR**

HAVING SEEN : Article 67 (5), Article 82 (4) and Article 72 (1) of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN : The Project Grant Agreement for the Rural Health Delivery Aid project No.649-0102 Agreement No.79-2, between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the United States of America, acting through the Agency for International Development (AID), signed at Mogadishu on 19th June, 1979.

TAKING NOTE : Of the approval of the People's Assembly of the said Project Grant Agreement dated 10th February, 1981.

Hereby promulgates the following Decree:

**Article I**

The Project Grant Agreement for the Rural Health Delivery Aid project No.649-0102 Agreement No.79-2, between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the United States of America, acting through the Agency for International Development (AID), signed at Mogadishu on 19th June, IS HEREBY RATIFIED.

**Article II**

This Agreement shall have the force of the law in the territory of the Somali Democratic Republic and enter into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic.

This Decree shall be published in the Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 10th March, 1981.

**PRESIDENTE OF THE SDR**  
**(Major General Mohamed Siad Barre)**

XEER-SHARCI iamb. 1 taariikh 31 Maarsu 1981, Baabi' inta Wakaaladda Ganacsiga Alaabta dhismaha.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qod. 69aad ce Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Sharciga lambar 12 ee 22ka November 1976, kuna saabsan dhismaha Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha;

MARKUU ARKAY : Sharciga lambar 18 ee 1da Februayo 1973 ee ku saabsan la wareegidda Dawladda dibad ka keenista iyo qaybinta alaabta dhismaha;

MARKUU TIXGELIYEY : Daraasadaha laga sameeyey muddooyinka dambe dhaqaalah Dalka, ujeed-dadooduna ahayd in lagu jaangooyo dhaqaalaheen-na duruufaha Dalka la soo gudboonaaday;

MARKUU ARKAY : In ay laga maarmaan tahay in labaabi'yo Hay'adaha Dawladda ee laga maarmi karro, hantidii ku bixi jirtay iyo ciidankii ka shaqeyn jirayna loo weeciyoo meelaha uga habboon ee nolosha Qaranka;

MARKUU DHEGEYSTAY : Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAY

Seerka soo socda:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo 31ka Maarr. 1981, waxaa la baabi'iyey Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha.

Qodobka 2aad

Guddiga Dhaqaalah, Ganacsiga iyo Maaliyadda ee GSK, Wasiirrada Ganacsiga, Maaliyadda, Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, waxaa loo xilsaaray, guddi ahaan, in ay u hawl galaan soona dhammeeyaan, mud-do bil ah gudaheed:

- a) Koobidda iyo soo uruurinta hantida Wakaaladda;
- b) Bixinta qaamaha Wakaaladda lagu leeyahay;
- t) Habeynta iyo ku mceleynta Shaqaalaha Walladda Hay'adaha kale ee Dawladda, iyadoo la eegayo hadba baahidooda;
- j) Tilmaamidda Hay'adaha Dawladda ee lagu wareejinayo masuuliyadda lacageynta badeecada-ha iyo qalabka yaalla maknaasiinnada Wakaaladda;
- x) Talo ka bixinta wareejinta qalabka shaqada ee Wakaaladda (gaadiid, qalab xafiis, qalab dayactir, iwm).

#### Qodobka 3aad

Maareeyaha Guud, Maareeyayaasha iyo Shaqaalaha Wakaaladdu, waxay sii wadanayaan shaqadoodii, il aaumar dambe, waxayna geegan siinayaan, kana amar qaadanayaan Guddiga ku tilmaaman Qod. 2aad ee Xeer-kan Sharci.

#### Qodobka 4aad

Qaadista khidmadda Wakaaladdu ku lahayd badeecada-ha dibeddu laga keeno, waxaa laga xilsaaray Wasaa-radda Maaliyadda.

#### Qodobka 5aad

Xeekan Sharci wuxuu dhaqan ge'ayaa laga bilaabo 31ka Maarsio 1981, waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, waxaana loo gudbinayaa Gelaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 31.3.1981

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER-SHARCI lambar 2 taariikh 31 Maar. 1981, Baabi'inta Wakaaladda Ganacsiga Dharka iyo Maacuunta.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Sharciga lambar 62 ee 21ka Okt. 1975, kuna saabsan la wareegidda ganacsiga dibad ka keenidda iyo qaybinta dharka, macuunka iyo qalabka xafiisyada;

MARKUU ARKAY : Shaciga lambar 68 ee 21ka Okt. 1975, kuna dhismaha Wakaaladda Ganacsiga Dharka iyo Maacuunka;

MARKUU TIXGELIYEY : Daraasadaha laga sameeyey muddooyinkan dambe dhaqaalaha Dalka, ujeedaduna hayd in lagu jaangooyo dhaqaalaheenna duruufaha Dalka la soo gudboonaaday;

MARKUU ARKAY : In ay laga maarmaan tahay in la baabi'ijo Hay'adaha Dawladda ee laga maarmi karro, hantidii ku bixi jirtay iyo ciidankii ka shaqeyn jirayna loo weeciyo meelaha uga habboon ee nolosha Qaranka;

MARKUU DHEGEYSTAY : Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo 31ka Maar. 1981, waxaa la baabi'iyey Wakaaladda Ganacsiga Dharka iyo Maacuunka.

Qodobka 2aad

Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadda ee GSK, Wasiirrada Ganacsiga, Maaliyadda, Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, waxaa loo xilsaaray guddi ahaan, in ay u hawl galaan, soona dhammeeyaan, muddo bil ah gudaheed:

- a) Koobidda iyo soo uruurinta hantida Wakaaladda;
- b) Bixinta qaamaha Wakaaladda lagu leeyahay;
- t ) Habeynta iyo ku meeleynta Shaqaalaha Wakaaladda Hay'adaha kale ee Dawladda, iyadoo la eegayo hadba baahidooda;
- j ) Tilmaamidda hay'adaha dawladda ee lagu wareejinayo masuuliyadda lacageynta badeecadaha iyo qalabka yaalla makhaasiinnada Wakaaladda;
- x) Talo ka bixinta wareejinta qalabka shaqada ee Wakaaladda (gaadiid, qalab xafiis iwm).

#### Qodobka 3aad

Maareeyaha Guud, Maareeyayaasha iyo Shaqaalaha Wakaaladdu waxay sii wadanayaan shaqadoodeed, amar dambe, waxayna gacan siinayaan, kana amar qaadanayaan Guddiga ku tilmaan Qod.2aad ee Xeerkan Sharci.

#### Qodobka 4aad

Qaadista khidmadda Wakaaladdu ku lahayd badeecadaha dibadda laga keeno, waxaa laga xilsaaray Wasaaradda Maaliyadda.

#### Qodobka 5aad

Xeerkan Sharci wuxuu dhaqan gelayaan laga bilaaboo 31ka Maarsio 1981, waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, waxaana loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 31.3.1981

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER-SHARCI lambar 3 taariikh 31 Maars 1981,

Baabi'inta Wakaaladda Horumarinta Xoolaha.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Sharciga lambar 34 ee 26kii Juun 1970 iyo Sharciga lambar 24 ee 18kii Luulyo 1974, kuna saabsan dhismaha Wakaaladda Horumarinta Xoolaha;

MARKUU TIXGELIYEY : Daraasadaha isdaba joogga ah ee laga sameeyey muddooyinkan dambe dhaqaalaha Dalka, ujeeddaduna ahayd in lagu jaango dhaqaalaheenna duruufaha Dalka la soo gudboonaada;

MARKUU ARKAY : In ay laga maarmaan tahay tacabka la kordhiyo, kharajka wax soo saarka iyo ka adeegga la dhimo, Hay'adaha iyo Wakaaladaha Dawladda ee xilalka isku nooca ah qabta la mideeyo, kuwa hawlahooda laga maarmi karana la baaibi'yo;

MARKUU ARKAY : In Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa ay si buuxda u hanan karto horumarinta xoolaha Dalka, ganacsiga caadiga ahna looga walwal la'aan karo suuq geynta xoolaha Dalka;

MARKUU DHAGEYSTAY : Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka-sharci ee soo socda:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo 29ka Maars 81, waxaa la baabi'iyey Wakaaladda Horumarinta Xoolaha.

Qodobka 2aad

Xilalkii Wakaaladda ka saarnaa horumarinta xoolaha, waxaa lagu wareejiyey Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

Qodobka 3aad

Guddiga Dhaqaalaha Ganacsiga iyo Maaliyadda ee GSK, Wasiirrada Maaliyadda, Ganacsiga, Xannaanada Xoolaha, Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, waxaa loo xil saaray, guddi ahaan, in ay u hawl galaan, soona dhammeeyaan, muddo bil ah gudaheed, koobidda iyo soo uruurinta hantida Wakaaladda, bixinta qaamaha Wakaaladda lagu leeyahay, habeynta iyo ku meeleynta Shaqaalaha Wakaaladda Hay'adaha kale ee Dawladda, iyadoo la eegayo hadba baahidooda, iyo talo ka bixinta wareejinta qalabka shaqada ee Wakaaladda (gaa-diid, qalab xafiis, hoosooyin, iwm).

Qodobka 4aad

Maareeyaha Guud, Maareeyayaasha iyo Shaqaalaha Wakaaladdu waxay sii wadanayaan shaqadoodii, ilaa amar dambe, waxayna gacan siinayaan, kana amar qaadanayaan Guddiga ku tilmaaman Qodobka 3aad ee Xeerkan Sharci.

Qodobka 5aad

Wax alla wixii xuquuq ah ee Wakaaladdu ku lahayd dhoofinta xoolaha, waxaa qaadeysa Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

Qodobka 6aad

Xeerkan Sharci wuxuu dhaqan gelayaan laga bilaaboo 31ka Maarsio 1981, waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, waxaana loo gudbi-nayaan Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 31.3.1981

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA

LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 23 ee 4 Feb. 1981  
Magacaabid Garsoore G/le Cabdi Cali Nuur.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qodobka 82aad ee Dastuurka  
J.D.S.

MARKUU ARKAY : Sharciga Tirsigiisu yahay 3 soo-  
na baxay 10kii Jennaayo 1970kii, kuna saabsan  
Dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka bed-  
delaadda ku dhacday;

MARKUU TIXGELIYEY : In ay laga maarmaan ta-  
hay in Garsoore lco magacaabo Maxkamadda Bad-  
baadada Dalka, si awooddeeda waxqabad sare loo-  
gu qaado, la isugu dheellitiro culeyska hawlahaa ay  
ka xil saaran tahay.

WUXUU SOO SAARAY

Seerka soo socda:

Qodobka 1aad

G/LE CABDI CALI NUUR oo ka tirsan Ciidanka  
Xoogga Dalka Soomaaliyeed waxaa loo magacaabay  
inuu noqdo Garsoore Maxkamadda Badbaadada Dalka  
ee Xamar.

Qodobka 2aad

Garsooruhu wuxuu yeelanayaa gunno dhan  
Sh.So. 800/= (Siddeed boqol) waxaana laga bixinayaa  
Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee Maamulka Lacagta  
MJDS.

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa mark uusaxiixo  
Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faa-  
finta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4.2.1981

MADAXWEYNAHA JDS  
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay,  
Diiwaanka lamb. 2 bogga lamb. 74,

Muqdisho, 22 Feb. 1981,

Hantidhowraha Guud KMG,  
Yusuf Cali Nuur.

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 24 ee 10 Feb. 1981,  
Magacaabid Garsoore G/le Maxamed Yuusuf Ax-  
med.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY : Sharciga Tirsigiisu yahay 3 soo-  
na baxay 10kii Jannaayo 1970, kuna saabsan Dhis-  
maha Maxkamadda Badbaadada Dalka beddelaad-  
da ku dhacday;

MARKUU TIXGELIYEY : In ay lagama maarmaan  
tahay in Garsoore loo magacaabo Maxkamadda  
Badbaadada Dalka, si awooddeeda waxqabad sare  
loogu qaado, la isugu dheellitiro culeyska ay ka  
xil saaran tahay.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qdobaka 1aad

G/LE MAXAMED YUUSUF AXMED oo ka tirsan  
Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed waxaa loo maga-  
caabay inuu noqdo Garsoore Maxkamadda Badbaadada  
Dalka Xamar.

Qdobka 2aad

Garsooruhu wux uuyeelanayaan gunno dhan  
Sh.So. 800/= (Siddeedboqol) waxaana laga bixinayaan  
Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee Maamulka Lacagta  
MJDS.

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxeexo  
Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 10.2.1981

MADAXWEYNAHA JDS  
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waanaragnay ee Diiwaangelinay,  
Diiwaanka lamb. 2 bogga lamb. 73,  
Muqdisho, 22.2.1981,  
Hantidhowraha Guud KMG,  
Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA H. GUUD: L. 25  
ee 30 SETEM. 1980

Cad dhul Dowlaadeed oo loo oggolaaday SHIRKADDA WARSHADDA I.F.C.A.CHEMICALS kana wakiil ah Isaaq Cali Caraale — kuna yaal Deg. Wardhiigley.

### W A S I I R K A

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamh. Dimoq. Soo;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona xabay 13kii Seb. 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jen. 1967 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY : Arjigii codsiga ahaa uu keensaday ISAAQ CALI CARAALE kana wakiil ah SHIRKADDA WARSHADDA I.F.C.A.CHEMICALS, taariikhdu markay ahayd 16.8.1978, kuna weydiistay dhisimo cad dhul Dawlaadeed oo ku yaal (Muqdisho) Degmada Wardhiigley.

ISAGOO AQOONSADAY : Caddeynta dhulka, kuna saabsan cad dhul Dawlaadeed ah ee uu weydiistay Jaallahaas ogeysiis ahaanna lagu faafiyey Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. yahay 1320, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoon-sadeen Guddiga dhismaha ee W.H.G. ee Muqdisho, fadhigoodii 18aad taariikhdeeduna ahayd 21.9.1978;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. 3412 taas oo bedeshay middii hore oo lambarkeedu ahaa 1320 laguna aqoonsaday fadhigii 22aad ee Guddiga W.H.G. Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta, kuna saabsan dhismo Warshad kuna fadhiya mq.13.000/=;

**ISAGO OARKAY :** Bolleetada lamb. 1019972 ee 26.12.1978, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in SHIRKADDA I.F.C.A. kana wakiil ah ISAAQ CALI CARAALE uu bixiyey lacag dhan Sh.So. 5.500/= kuna saabsan qii-maha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

**ISAGOO AQOONSADAY :** Dhulka la weydiistay, oo k ufadhiya mq.13.000/= tilmaan cadna laga siiyey WARSHADDA I.F.C.A. kana wakiil ah ISAAQ CALI CARAALE sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W.H.G. (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 27.12.1978;

**ISAGOO ARKAY :** Xaqijintii Farsamada Sah. Abuu-kar Maxamed Sheekh kana tirsan Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W.H.G. lamb. yahay 3412 laguna xaqijihey sida naqshaddu WARSHADDA waafaqsantahay dhismaha kuna fadhiya mq. 13.000/ →

**ISAGOO ARKAY :** Oggolaanshaha (Nulla Osta) ku dhaqankeeda ama degganaashada Warshadda oo ku dhisan Muqdisho Degmada Wardhiigley soona 21° Oktoobar laguna siiyey xaashida lamb.1813/80 ee ka soo baxday Dowladda Hoose ee Xamar (Xafiiska Farsamada dhulka);

**ISAGOO TIXGELIYEY :** In wax allaale wixii xeer ahaa oo ku saabsan siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dawladeed (Concessione e consegusnte libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis, cad dhul Dawladeed lagama maarmaan tahay in xuquuqda Sharciga ahaa loo aqoonsado Shirkaddaas kor ku qoran.

## WUXUU XEERAYAA

Waxaa dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday SHIRKADDA WARSHADDA I.F.C.A.CHEMICALS kana wakiil ah ISAAQ CALI CARRAALE, dhul ku fadhiya mq.13.000/= kuna yaal Muqdisho, Degmada Wardhiigley zona 21 Oktoobar.

Muqdisho, 30.9.1980

## WASIIRKA WASAARADDA HAWLAHA GUUD

S/Guuto Maxamuud Nuur Galaal

WAAN ARAGNAY EE DIIWANGELINAY  
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 2.

Muqdisho, 3.1.1981.

Hantidhowraha Guud KMG,  
Yuusuf Cali Nuur.

QAYBTA

SADDEXAAD

SOCIETA , COMMERCIALE ITALO-SOMALA-S.C.I.S.-

S. P. A.

*Saldhigga:* MUQDISHO (J.D. Soomaaliya)

Raasumaal Sh.So. 5.000.000

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha Shirkadda Società Commerciale Italo Somala-S.C.I.S.-S.P.A., waxaa la isugu yeeray shirkka caadiga ah ee lagu qaban doono Lugano waddada Elvezia, Lamb. 10, maalinta 24ka Juunyo 1981 saacad-da markay tahay 14, fadhiga ugu horreeya, haddii taas suura galiwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 30ka Juunyo 1981 isla saacadda kor ku qoran, si go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

#### MARNAAMIJKA DOODDA

- 1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista.
- 2) Miisaaniyadda iyo Dheef-Deynta la xiray 31.12.80 iyo go'annada la xiriira.

Waxaa xaq u leh in ay Shirkadda ka soo qayb galaaan Sahmi qabayaasha ku qoran buugga xubnaha Shirkadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhi-ga la qaban doono, cona ilaa waqtigaas dhigan sahmi-yaashooda saldhigga Shirkadda ee Muqdisho, amase Xafiiska Shirkadda Società Agricola Italo Somala ay ku leedahay Milano, waddada Cappucini Lamb. 14, amase -Credita Italiano, Sede di Milano;

- Banco di Roma per la Svizzera Italiano, Lugano;
- Lemanik, Corso Elvezia, Lamb. 10, Lugano.

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA, COMMERCIALE ITALO-SOMALA-S.C.I.S.--  
S. P .A.

*Sede Sociale:* MOGADISCIO (Repub. Democr.Somala)

Sede Sociale: inter voescto Shs. 5.000.000

**AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA**

Gli Azionisti della Società Commerciale Italo Somalia-S.C.I.A.-S.P.A., sono convocati in Assemblea Ordinaria in Lugano, Corso Elvezia n° 10, il giorno 24 Giugno 1981, alle ore 14, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 30 Giugno 1981, nella stesso luogo ed alla stessa ora, per discudere e deliberare sul seguente:

**ORDINE DEL GIORNO**

- 1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
- 2) Bilancio e Conto perdite & Profitti dell' Esercizio chiuso al 31 Dicembre 1980 e deliberazioni relative .

Avranno diritto di partecipare all' Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro Dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissata per l' Assemblea o che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede Sociale in Mogadiscio o presso gli Uffici di Recapito della Società Agricola Italo Somala in Italia, Via Cappuccini 14, Milano, oppure presso le seguenti casse:

- Credito Italiano, Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;
- Lemanik, Corso Elvezia n° 10, Lugano.

**IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE**

SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA-S. P. A.

*Saldhigga: Kismaayo (Jamhuuriyadda D. Soomaaliya)*

Raasumaal Sh.So. 2.000.000

**CGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH**

Sahmi qabayaasha Shirkadda SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA- S.P.A.- waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Lugano, waddada Elvezia, Lamb. 10, maalinta 24 ka Juunyo 1981, saacadda 11ka subaxnimo fadhiga ugu horreeya, haddii taas suura geliweydo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 30ka Juunyo 1981 isla saacadda iyo isla meesha sida kor ku qoran, si go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

**BARNAAMIJKA DOODDA**

- 1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;
- 2) Miisaaniyadda iyo Dheef-Deynta la xiray 31.12.1980 iyo go'aannada la xiriira;
- 3) Magacaabid Guddiga Maamulka, iyadoo loo xaddidaayo tirada xubinyada;
- 4) Magacaabid Guddiga Baarayaasha sida shar-cigu qabo.

Waxaa xaq u leh in ay Shirkadda ka soo qayb ga-laan, Sahmi qabayaasha ku qoran buugga xubnaha Shirkadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhi-ga la qaban doono, oo na ilaa waqtigaas dhigaan Sahmi-yaashooda saldhigga Shirkadda ee Kismaayo, amase Xafiiska Shirkadda ku yaal Itaaliya, waddada Cappuc-cini, 14 Milano, amase:

- Credito Italiano-Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;
- Lemanik, Corso Elvezia n° 10, Lugano.

SOCIETA' ROMANA IN SOMALA — S. P. A.

Sede Sociale: CHISIMAIO — Repubblica Democr. Somalia Capitale sociale inter. versato Sh.So. 2.000.000.-

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Romana in Somalia, S.P.A., sono convocati in Assemblea Ordinaria in Lugano, Corso Elvezia n° 10, il giorno 24 Giugno 1981, alle ore 11, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione in giorno 30 Giugno 1981, nella stesso luogo ed alla stessa ora per discutere e deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

- 1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
- 2) Bilancio e Conto Perdite e Profitti dell' Esercizio chiuso al 31 Dicembre 1980 e deliberazione relative;
- 3) Nomina del Colleco di Amministrazione, previa determinazione del numero dei suoi membri;
- 4) Nomina del Collegio Sindacale a norma di legge.

Avranno diritto di partecipare all' Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l' Assemblea o che entro tale termine abbiano effettuato in deposito delle azione presso la Sede Sociale in Chisimaio o presso gli Uffici di Recapito in Italia del la Società Agricola Italo Somala, Milano, Via Cappuccini n° 14, appure presso le seguenti casse:

- Credito Italiano, Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;
- Lemanik, Corso Elvezia n° 10, Lugano.

IL CANSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA- S.A.I.S.-S.P.A.

Saldhigga: Muqdisho (J. D. Soomaaliya)

Raasumaal Sh.So. 1.200.000,oo

### OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha Shirkadda SOCIETA' AGRICOLA ITALO—SOMALA — S.A.I.S. — S.P.A., waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Lugano, waddada Elvezia, Lamb. 10, maalinta 24 Juunyo 1981 saacadda 9ka subaxnimo fadhiga ugu horreeya, haddii taas suura geliwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 30ka Juunyo 1981 isla saacadda iyo isla meesha sida kor ku qoran, si go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

### BARNAAMIJKA DOODDA

- 1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;
- 2) Miisaaniyadda iyo Kharajka iyo Dakhliga ilaa 31 Disseembar 1980 iyo go'aannada la xiriira;
- 3) Magacaabidda Guddiga Maamulka, iyadoo la xaddidaayo tirada xubinyada;
- 4) Magacaabidda Guddiga Baarayaasha sida sharciga qabo.

Waxaa xaq u leh in ay Shirkadda ka soo qayb galaan, sahmi qaba yaasha ku qoran buugga xubnaha Shirkadda shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono, oo aan ilaa waqtigaas dhigan sahmiyaashooda saldhigga Shirkadda ee Muqdisho, amase Xafiiska Shirkadda oo ku yaal Itaaliya, waddada Cappucini 14, Milano, amase:

- Credito Italiano, Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;
- Lemanik, Corso Elvezia 10, Lugano.

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA' AGRICOLA ITALO — SOMALA S.A.I.S.-S.P.A.  
Sede sociale: Mogadiscio — Repub. Democr. Somalia

Capitale sociale inter.versato Sh.So. 1.200.000.-

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gil Azionisti della Società Agricola Italo-Somala S.A.I.S. - S.P.A. sono convocati in Assemblea Ordinaria in Lugano, Corso Elvezia n° 10, il giorno 24 Giugno 1981, alle ore 9, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 30 Giugno 1981, nella stesso luogo ed alla stessa ora per discutere e deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

- 1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
- 2) Bilancio e Conto Perduto & Profitti dell' Esercizio chiuso al 31 Dicembre 1980 e deliberazioni relative;
- 3) Nomina del Consiglio di Amministrazione previa determinazione del numero dei suoi componenti;
- 4) Nomina del Collegio Sindacale a norma di legge.

Avranno diritto di partecipare all' Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l' Assemblea o che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede Sociale in Mogadiscio o presso gli Uffici di Recapito della Società in Italia, Via Cappuccini n° 14, Milano, oppure presso le seguenti casse:

- Credito Italiano, Sede di Milano;
- Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;
- Lemanik, Corso Elvezia n° 10, Lugano.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAH A MAXKAMADDA G. BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY : In Buug Keyd dhumay oo lambarkisu ahay 5740, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta laaad kuna qornayd lacag dhan Sh.So. 31.437/= uu iska lahaa Maxamuud Axmed Xasan sida ku cad wasqadda lamb. \_\_\_\_\_ Taariikh 20.4.81 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta laaad.

HADDUU ARKAY : Qod. 69 Sharciga lamb.2 9.9.65,

## WUXU UXERIYEH

In la baabi'yo (Amortamento) Buug Keyd Lamb. 5740 oo k uqoran magaca Maxamuud Axmed Xasan ayna k ujirto Sh.So. 31.437/=

## WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta laaad u bedelo Maxamuud Axmed Xasan Buugga Keydka ee kor k utilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30, maal mood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaa gah laga keenin.

Muqdisho, 20.4.1981

GUDDOOMIYAH A MAXKAMADDA G. BANAADIR

(Dr. Cabdullaahi Maxame dMaax)

— MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED —

D E K E R E E T O L . 5 / 8 1

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed

MARKUU ARKAY : arjiga taariikhdiisu tahay 12.10.80, ee uu soo qortay Jaalle Xaaji Saciid Warsame Ducaale, kuna codsaday in loo cusbooneysiiyo Jeegga Wareega ee Lambar yahay 030545 taariikh 13.9.80, laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Ceeri/Gaab oo Gobolka Sanaag, lacagta Jeegga ku qoranina ahayd Sh.S. 5,000/=;

MARKUU ARKAY : Xaashida Lambar yahay 1658, taariikh 15.10.80, ee uu Maxkamaddan u soo qoray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Hargeysa oo caddeeyey jiritaanka Jeegga lumay iyo lahaanshaha Jaalle Xaaji Saciid Warsame Ducaale;

MARKUU EEGAY : Qodobka 69-70 ee Xeerka lambar yahay 9 Bis, soona baxay 9 Seb. 1965, N.2

WUXUU BAABI'IYEEY

Qiimihii Jeeggii lumay ee lambarkiisa iyo lacagtii-suba kor ku xusan yihiin.

WUXUUNA AMRAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, uu u cusbooneysiyo Jaalle Xaaji Siciid Warsame Ducaale, cusbooneysiintaas Jeegga cusubna isaga gacanta laga saaro ama ciddii kale ee uu soo siiyo Wakaalad sharci ah 15 Maalmood ka dib maalinta Digreetadan laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

## WAXAA LA FARAYAA

Maamulka Bankiga Ganacsiga Umadda Laanta  
Hargeysa in uu ku dhejiyo Naqallada Dekareetadan  
irdaha Bankiga si ciddii dan ka lihi halkaas uga eegato.  
Hargeysa, 25.4.81

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed

J.le Ibraahim Faarax Maxamed

Kaaliyaha Maxkamadda

Jaalle Maxamed D. Maxamed